Maahanmuuttovirasto
Migrationsverket
Finnish Immigration Service

TURVAPAIKKA-, MAAHANMUUTTO- JA KOTOUTTAMISRAHASTO

Euroopan unionin tuella

# Waraysiga dhanka fiidiyoowga ee lala yeelanaayo ilmaha aan waalidkiis la socon

Waxaa laguuugu yeeray waraysiga magangelyaddoonka ee Hoggaanka socdaalka. Hgaistaan waxaa ay kuu sheegeysaa xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga la xiriira waraysiga lagula yeelanaayo. Adiga iyo wakiilkaaga wada akhriya. Haddii wax uun ka mid ah arrinkaan aad fahmi weyso, waxaad faahfaahin dheeraad ah weydiisataa wakiilka ama shaqaalaha Hoggaanka socdaalka, bilowga hore ee waraysiga.

## Waa maxay ujeeddada waraysiga?

- Waxaad Finland ka codsatay magangelyo. Waraysiga waxaa lagu caddaynayaa sababaha aad iyaga dartoood magangelyada uga codsatay Finland, oo sababahaas awgoodna aadan dib ugu laaban karin dalkaagii.
- Waa muhiim, inaad ku sheegto waraysigaan dhammaan waxyaabaha aad ku salaynayso codsigaaga. Haddii aad hayso sababo cusub waraysigii lagula yeeshay kaddib, amaba aad doonayso inaad bixiso macluumaad cusub oo ku saabsan arrimhii aad hore u sheegtay, waxaad arrinkaas sida ugu dhakhsaha badan ugu sheegtaa Hoggaanka socdaalka ama maxkamadda falanqaynaysa racfaankaagaa.
- Waraysiga waxaa lagu falanqaynayaa oo keliya codsiga magangelyaddoonista. Haddii ay Finland joogaan dad ka mid ah xubnaha qoyskaaga, waxaad sharciga degganaanshaha ama ciqaamadda ku codsan kartaa sababta ah xiriirka qoysnimo, waa in aad samaysaa codsiga sharciga degganaanshaha ee gaarka ah, kaasoo ah mid lacag la bixinaayo.

## Waa maxay xuquuqaha aad leedahay waraysigaan dhexdiisa?

- Wakiilkaaga ayaa kuu soo raacaya waraysiga
- Waxaad xaq u leedahay waraysigaan inta uu socdo, in aad qabsato qareen kaa caawiya arrimaha sharciyada.
- Wakiilkaaga ayaa xil iska saaraaya haddii aad u baahato in aad hesho qof caawiye ah oo kula jooga waraysiga. Haddii uusan wakiilkaagu kuu raadin qof caawiye ah oo waraysiga kula jooga, si kastaba waraysiga waxaan qaadi karnaa iyadoo aan caawiye kula joogin.
- Waraysiga waxaa jooga turjubaan. Shaqada turjubaanku waa in isagoo aan cidna la jirin uu si dhexdhexaad ah u turjumaa dhammaanba wixii waraysiga dhexdiisa lagu sheego. Turjubaanku wuxuu noqon karaa mid goobta waraysigu ka dhacaayo jooga, ama khadka telefoonka ku turjumaaya, ama fiidiyoow ahaan u turjumaaya.
- Qofka waraysiga qaadaaya, turjubaanka iyo qareenka waxaa saaran waajibka ah in ay sirta qariyaan, taasoo loola jeedo in aanay cid kale oo arrinkaan ka baxsan u sheegi karin wixii ay ka maqleen waraysiga dhexdiisa. Arrimaha aad ku sheegeyso waraysiga, waxaa dhici karta in ay saamayn ku yeeshaan falanqaynta codsiyada xubnaha qoyskaaga. Xaaladahaan oo kale waxaan tixgelin gaar ah siin doonnaa arrimahaas xubnaha qoyskaaga. Si kastaba waan ka qarin karnaa wixii aad sheegtay xubnaha qoyskaaga, haddii sheegista arrimahaas ay adiga iyo ehelkaagaba ku keeni karaan dhibaato ama halis. Wixii aragtidaada la xiriira ee arrimahaas ku saabsan waxaad ku sheegi kartaa waraysiga dhexdiisa.
- Hoggaanka socdaalku waa uu baari karaa, taasoo loola jeedo in uu raadraac ku samayn karo waalidkaaga dhabta ah. Waalidka dhabta ah waxaa loola jeedaa qofkii adiga kugu daryeelaayay dalkaagii. Raadraacista waxaa loo adeegsanayaa oo keliya macluuumaadka muhiimka ah ee dhanka raadraacista. Hoggaanka socdaalku waxaa uu raadraacaas u samaynayaa, qaab aan wax dhibaato ah ku keeneynin adiga ama ehelkaaga.

## Waa maxay waajibaadka ku saaran adiga waraysigaan dhexdiisa?

- Waxaa adiga waajib kugu ah in aad sheegto oo aad sharraxaad ka bixiso, waa maxay sababta aad u codsanayso magangalyada. Ku sheeg waraysiga dhammaan arrimaha ku saabsan codsigaaga.
- Waa arrin ay dantaadu ku jirto in aad sheegto arrimaha adag ama dhibka badan. Waxaana dhici karta in arrimahaasi ay xal muhiim ah u yihiin codsigaaga.
- Runta sheeg. Haddii aadan xusuusan ama aadan garanayn waxa lagu weydiiyay, ha isku dayin inaad jawaabta wax uun iska allifto ama iska hindisto. Waxaad tiraahdaa, ma

aqaan ama ma xusuusto. Haddii aad runta sheegi weydo, waxaa arrinkaas uu hoos u dhigayaa rumaysashada la rumaysan lahaa wixii aad sheegtay.

- Marka lagu waraysanaayo waxaad sheegtaa macluumaadka aqoonsigaaga shakhsiyadeed (magaca iyo taariikhda dhalashada) ee saxda ah. Haddii aadan haysan wax dukuminti ah oo lagu caddeyn karo aqoonsigaaga shakhsiyadeed, waa inaad sida kuugu suuraggalsan u raadsataa dukuminti, islamarkaana aad ugu soo gudbisaa Hoggaanka socdaalka. Dukumintiyadaas waxaa ay noqon karaan tusaale ahaan kaarka aqoonsiga ama dukumintiga safarka. Si kastaba Hoggaanka socdaalka kuguma waajibin karo adiga inaad cadddaynta u raadsato qaab khatar gelin kara ammaankaaga ama kan ehelkaaga. Waxaad hadhoow macluumadka shakhsi ahaaneed ku beddali kartaa, marka aad keento dukuminti dawladeed la aamini karo oo ku saabsan macluuumaadka shakhsiga.

- Hoggaanka Socdaalka waxaa uu macluumaadka shakhsiyadeed iyo waxyaabaha salka u ah codsigaaga ku kaydinayaa nidaamka falanqaynta xogta ee arrimaha dadka ajnabiga ah, kaasoo ah diiwaanka rasmiga ah ee dowladda.
- In la siiyo hay'adaha dowladda macluumaad shakhsiyadeed aan sax ahayn ama xog aan sax ahayn oo loo gudbiyo diiwaanka dowladda. Finland gudaheeda waxaa mas'uuliyadda dambigu ay khusaysaa qofka buuxiyay da'da 15-ka sano.
- Waxaad ogaataa in bixinta macluumaad shakhsiyadeed aan sax ahayn ama qarinta macluumaadkii saxda ahaa, ay kugu keeni karto in lagaala noqdo sharcigii oggolaanshaha ee lagu siiyay, islamarkaana waxaa ay dhibaato ku noqonaysaa oo adkaynaysaa falanqaynta arrimaha kale ee adiga ku khuseeya.

## Sidee ayaa waraysiga loogu soo diyaargaroobayaa?

- Waraysiga kahor isla soo akhriya adiga iyo wakiilkaaga, oo u kuurgala dhammaan hagista iyo qoraallada ay ku siiyeen hawlwdeennada dowladda. Waa muhiim sidoo kale inaad soo fiirfiiriso qoraallada ku saabsan nidaamka Dublin. Haddii aadan qoraalladaas haysanin, waxaad ka heleysaa bogga Hoggaanka socdaalka ee cinwaankiisu yahay: migri.fi/esitteet. Warbixinnadu waxaa ay ku hoos jiraan cinwaanka ah "Turvapaikka ja Dublin-menettely" oo loola jeedo "Magangalyada iyo nidaamka Dublin".

- Haddii aad haysato sabab sax ah oo aad ku doonayso, in turjubaanku uu noqdo qof dumar ah ama nin, waxaad arrinkaas u sheegtaa wakiilkaaga wakhti ka horreeya xilliga wareysiga. Isaga ayaa codsigaaga u soo gudbin doona Hoggaanka socdaalka. Hoggaanka socdaalka ayaa qiimayn ku samaynaaya, in sababtaasi ay tahay mid wax sax ah ku salaysan iyo inkale.

- Haddii xaaladdaada caafimaad ee jir ahaaneed ama nafsad ahaaneed ay tahay mid saamayn ku yeelan karta waraysiga, waxaad arrinkaas hore ugu sheegtaa wakiilkaaga ama shaqaalaha xerada qaxootiga.

- Hore u soo qaado cuntadaada ama lacag aad cunto ku soo iibsato. Haddii ay suurtaggal kuu tahay, waxaad ka soo cuntayn kartaa meel kale.

- Hore u soo qaado wixii daawo ah ee aad maalinkaa u baahan tahay.

- U soo dir Hoggaanka socdaalka wixii caddaymo dheeraad ah ee aad hayso, kahor waraysiga. Haddii wakhtiga waraysiga uu wax yar ka dhimman yahay, hore u soo qaado dhammaanba caddaymaha iyo dukumintiyada la xiriira codsigaaga.
- Wakhti hore imoow goobta.

## Sidaan soo socota ayaad samaynaysaa maalinka waraysiga

- Waraysiga dib uma dhigi kartid, wax sabab la aqbali karo ah la'aanteed ah. Haddii aad xanuunsato maalinka waraysiga, sida ugu dhakhsaha badan ugu sheeg xeradaada qaxootiga. Wakiilkaaga waa inuu u soo gudbiyaa Hoggaanka socdaalka, warqadda dhakhtarka ama kalkaalisada ee ku saabsan xanuunkaaga, ugu dambayn 1 toddobaad gudihiis, laga soo bilaabo maalinkii waraysiga. Haddii aad wax sabab la aqbali karo la'aanteed ah uga joogtay waraysigii magangelyoddoonista, codsiga waxaa go'aan laga gaari karaa iyadoo aan wax waraysi ah lagaa qaadin.
- Wakiilkaaga ama caawiyahaaga ayaa kula joogaya oo kaala qaybqaadanaaya waraysiga.
- Waraysiga waxaa imaan kara oo keliya dadka loogu yeeray waraysiga, iyo shakhsiyaadka kale ee hore loogala heshiiyay Hoggaanka socdaalka.
- Haddaad u baahan tahay qof caawiye ah, waa in ay wakiilka ama qofka caawiyaha ah arrinkaas hore qoraal ahaan ugu soo weydiiyaan Hoggaanka socdaalka. Xaaladaha kale, waraystaha ayaa go'aan ka gaaraaya bilowga waraysiga, in qofka caawiyaha ah uu waraysiga joogi karo iyo inkale. Qofka caawiyaha ah ma ahan caawiye dhanka sharciyada ah, mana ka qayb qaadan karo caddaynta arrimaha waraysiga.
- Waraystuhu waa qof shaqaale ah oo ka tirsan Hoggaanka socdaalka.
- Waraysiga waa la duubayaa. Waxaa intaas dheer oo qolka ku jirta kaameradda ilaalinta oo wax duubaysa.
- Waraysigu wuxuu qaadan karaa maalinka oo dhan. Inta waraysigu socdo waxaan geli doonnaa baririf ama nasasho qado, haddii loo baahdana waxaa la qaadan karaa xilliyo kale oo baririf ama nasasho ah. Adiga laftigaaga markii aad u baahato waad codsan karaa baririfta ama nasashada.
- Haddii loo baahdo, waraysigu wuxuu sii socon karaa illaa iyo maalin kale. Haddii ay taasu dhacdana waxaa laguu soo diri doonaa waraaq u yeeris ah oo wakhtiga ballanka cusub uu ku yaallo.

## Maxaa ka dhacaaya waraysiga dhexdiisa?

- Marka ugu horraysa qofka waraysiga qaadaaya wuxuu kuu sheegayaa, waxyaabaha la samaynaayo waraysiga dhexdiisa, wuxuuna hubinayaa in aad fahamtay xuquuqdaada iyo waajibaadka lagugu leeyahay iyo inkale. Haddii aadan waxyaabaha qaarkood fahmin weydii qofka waraysiga qaadaaya. U sheeg waraystaha haddii aadan fahmin hadalka turjubaanka.

- Haddii aan si dhab ah aqoonsigaaga shakhsiyadeed hore loogu soo caddaynin, qofka waraysiga qaadaaya ayaa marka ugu horraysa ku weydiinaaya arrinkaas. Wuxuu ku weydiinaayaa inta xubnood ee uu qoyskaagu ka kooban yahay, halka aad ku nooleyd iyo marinka ama jidka aad u soo martay imaanshahaaga dalkaan Finland. Waxaa sidoo kale uu adiga ku weydiin doonaa arrimaha saamaynta ku yeelan kara, in codsigaaga lagu falanqayn doono Finland, ama aan la baari doonin iyo inkale.
- Intaa dabadeed waxaa la caddayn doonaa sababta aad uga soo carartay dalkaagii iyo sababta aadan ugu noqon karin halkaas. Si daacadnimo leh oo faahfaahsan uga hadal arrimihii adiga kugu soo dhacay.
- Waraysi qaadaha ayaa adiga ku weydiinaaya su'aalo uu ku caddaysanaayo wixii aad u sheegtay ee ahaa dhacdooyinka ku soo maray. Si daacadnimo leh uga jawaab. iska ilaali inaad sheegto jawaab aan sax ahayn oo aad iskaa u aliftay ama u hindistay. Sheeg haddii aadan xusuusan ama aadan garanayn.
- Dhammaan dadka magangalyaddoonka ah waxaa la weydiiyaa su'aalo guud oo la isla ogyahay. Qofka waraysiga qaadaaya wuxuu sidoo kale ku weydiinayaa fikradda aad ka qabto waddan ka saarista iyo u diidista dal soo gelista.
- Wakiilka ama caawiyaha midkoodna kama jawaabi karo su'aalaha adiga lagu weydiinaayo. Inta waraysigu socdo waa ay kula talin karaan, waxaana ay ku soo xusuusin karaan arrimha muhiimka ah ee aad hore ugu sheegtay.
- Hoggaanka socdaalka waxaa uu waraysiga kaaga dhegeysan karaa, caddaymaha saamaynta ku yeelan kara go'aanka arrinkaaga. Tusaale ahaan, Haddii adiga lagugu tuhunsan yahay dambi aad ka samaysay Finland gudaheeda, amaba lagugu xukumay dambi aad ka gaysatay Finland gudaheeda, waxaa arrinkaas uu saamayn ku yeelan karaa falanqaynta codsigaaga ee Hoggaanka socdaalka. Hoggaanka socdaalka waxaa haddii loo baahdo inta waraysigu uu socdo, uu adiga ku siinayaa fursad aad ku sheegi karto fikirkaaga la xiriira arrinka.
- Qofka waraysiga qaadaaya, kombiyuutarka ayuu ku qorayaa waxa lagu sheego waraysiga. Waxyaabahaas qoraalka laga sameeyay waxaa loogu yeeraa dukumintiga qoraalka (pöytäkirja). Qofka waraysiga qaadaayaa ayaa adiga kula hubin doonaa qoraalka laga sameeyay waraysiga qayb ahaantiisa ama gabi ahaantiisa, haddii Hoggaanka socdaalka uu u arko in arrinka hubinta ah loo baahan yahay. Sheeg haddii aad qoraalka ku aragto waxyaabo khalad ah. Haddii qofka waraysiga qaadaaya uusan adiga kula hubin qoraalka laga sameeyay waraysiga gabi ahaantiisa, waxaa laguu qabanayaa wakhtiga kama dambaysta ah ee aad ku soo dirayso wixii sixitaan ama wax ku kordhin ah ee waraysiga la xiriira. Waxaan koobiga qoraalkaan u soo diraynnaa wakiilkaaga.

## Qaabkee ayuu Hoggaanka socdaalka ku gaaraa go'aanka?

- Iyadoo lagu salaynaayo codsigaaga ayaa waxaa lagu siin karaa badbaadada caalamiga ah, ama waxaa lagu siin karaa sharciga degganaanshaha ee lagu saleeyay sababo bani'aadnnimo gaar ah, ama sababta ah in aad soo noqotay dhibbane soo maray ka ganacsiga dadka awgood.
- Hoggaanka socdaalka waxaa uu ku gaarayaa go'aanka arrinkaaga ku saabsan, isagoo ku salaynaaya macluumaadkii aad ku siisay waraysigii lagula yeeshay, iyo wixii

kale ee caddayn ah ee aad u soo bandhigto. Hoggaanka socdaalku waxaa sidoo kale uu ka raadin karaa macluumaadka la xiriira dhanka go'aanka, ilaha guud ee dadweynaha.

- Hoggaanka socdaalku waxaa haddii loo baahdo uu dalkaaga ka dalban karaa caddaynta ku saabsan dhab ahaanta ama asal ahaanta dukumintigaaga. Hawlwadeennada dowladda dalkaaga ma ogaanaayaan arrinkaan, caddaynta arrinkaasna wax khatar ah uma keeneeyso adiga iyo ehelkaaga toonna.
- Haddii qofka waraysiga qaadaaya uusan adiga kula hubin qoraalka laga sameeyay waraysiga gabi ahaantiisa, waxaa laguu qabanayaa wakhtiga kama dambaysta ah ee aad ku soo dirayso wixii sixitaan ama wax ku kordhin ah ee qoraalka laga sameeyay waraysiga la xiriira. Waad soo diri kartaa caddaymaha dheeraadka ah ee codsigaaga la xiriira xittaa wakhtiga kama damabaysta ah ee laguu qabtay kaddib, illaa iyo inta aad ka heleyso go'aanka codsigaaga. Waxaad ogaataa arrinka ah, in caddaymaha dheeraadka ah ee la soo diray wakhtigii kama dambaysta ahaa ee laguu qabtay kaddib aan la awoodin in la tixgeliyo marka go'aanka la gaaraayo. Caddaymaha dheeraadka ah waxaad u soo gudbisaa qaab qoraal ah.
- Haddii codsigaaga la diido ama la kansalo, dib ayaa laguu celin karaa waxaana la amri karaa diidmada dal soo gelista ee ku saabsan, soo gelista dalkaan Finland iyo wadamada uu ka dhexeeyo heshiiska Schngen.
- Sida ugu dhakhsaha badan ugu sheeg hawlwadeennada dowladda waxyaabaha cusub ee suurtaggalka ah ee aad ku salaynayso codsiga magangelyoddoonista, xittaa xaaladaha ay jirto in codsigaaga magangelyoddoonista uusan kuu dalbanayn ama uusan kuu xereysnayn. Haddii aad sida ugu dhakhsaha badan ee aad awooddo u soo gudbin wayso arrimaha ama sababaha cusub, waxaa dhici karta in sababahaas aan wax baaris ah lagu samaynin, haddii codsiga cusub ee magangelyoddoonista ah ee aad samaysay aad ku salayso sababahaas. Waxaa kugu waajib ah in aad haysato wax uun sabab ah, oo sheegeysa sababta aad hore ugu sheegi weyday waxyaabaha cusub ee aad ku salaynayso codsigaaga. Sababtu waa in ay noqotaa, mid aadan adigu awoodin in aad saamayn ku yeelato. Arrinkaa kaddib Hoggaanka socdaalka waxaa uu qiimayn ku samayn doonaa arrinka ah in uu baaritaan ku samaynaayo codsigaaga cusub iyo inkale.